



National Institute for Public Health
and the Environment
Ministry of Health, Welfare and Sport

Caabuqa Qaaxada

Xog ku saabsan daaweynta



Xataa haddii aadan xanuunsanayn, wali waxaad qabi kartaa bakteeriyada qaaxada (TB). Kani waxaa loo yaqaan caabuqa qaaxada. Daaweynta caabuqa TB waxay kaa ilaalin kartaa inaad dib ka qaado qaaxada (TB). Xaashidaan waxaa ku qoran xog dheeraad ah oo ku saabsan daaweynta.

Waa maxay caabuqa qaaxada?

Waxaa lagaa baaray cudurka qaaxada. Waxaad sameysay baaritaanka maqaarka ama baaritaanka dhiiga. Ama labadaba. Natiijada baaritaanka waxay sheegtay inaad qabto xanuunka. Arrintaan waxay la micno tahay in jirkaaga ay kujirto bakteeriyada qaaxada. Raajitada xabadka ma aysan muujin wax cilad ah. Bakteeriyada kujirta jirkaaga waa mid aan firfircooneyn; wayna huridaa'. Ma xanuunsanid, mana qabtid qaaxada (TB) dadka kalena ma qaadsiin kartid caabuqa. Laakiin waxaad qabtaa caabuqa qaaxada. Bakteeriyada jirkaaga uma gudbi karto dadka kale xataa haddii aad ku hindhisto, ku qufacdo, salaanto ama aad dhunkato.

Caabuqa qaaxada (TB) da wuu soo labo kaclayn karaa muddo kadib. Markaas kadibna waxaad dareemi kartaa xanuun. Boqolkiiba 10% kamid ah dadka qaba caabuqa TB-da muddo kadib waxaa ku dhaca qaaxada. Kala bar waxay la kulmaan xanuunka labo sano gudahood kadib marka uu ku dhaco caabuqa. caafimaadkaaga ma waxaa saameeyay cudurada kale, sida HIV, ama ma waxaad qaadataa daawooyinka daciifiya nidaamka difaaca jirka? Haddii jawaabtaadu haa tahay, waxaad halis saaid ah ugu jirtaa inaad qaado qaaxada (TB).

Daawada lagu daaweeyo kansarka, xanuunka kalagoysyada ku dhaca ama cudurada maqaarka waxay daciifin karaan nidaamka difaaca jirkaaga, marka mar walba u sheeg daktarka qoyskaaga ama khabiirka inaad qabto caabuqa qaaxada (TB).

Daaweynta caabuqa qaaxada

Maxay sameysaa daaweyntu?

Daawooyinku waxay qofka ka ilaaliyaan inuu muddo kadib qaado cudurka qaaxada. Daawooyinku waxay dilaan bakteeriyada qaaxada 'ee hurida'. Markaas halista aad ugu jirto inaad qaado cudurka qaaxada ayaa aad u yaraaneysa.

Daawooyin sideo ah ayaa la isiin doonaa?

Dakhtarku wuxuu kuu sheegi doonaa daawooyinka uu ku siin doono iyo mudada aad qaadnayso. Daawooyinka inta badan la isticmaalo waa isoniazid iyo rifampicin. Badanaa waxay kuwada jiraan hal kaniini (Rifinah).



Imisa jeer ayaa daawada qaadanaaya?

Waa inaad qaadato daawadaada hal mar maalintii. Qaado daawooyinkaaga waqti isku mid ah maalintii, sida subaxdii, ama galabkii.



Muddo intee le'eg ayaan daawada qaadanaaya?

Daaweyntu waxay socotaa muddo ugu yaraan dhan saddex billood. Ayadoo ay ku xiran tahay nooca daawada aad qaadanaayo. Waa muhiim inaad joogteyso qaadashada daawada illaa aad ka dhameyneyso kuurada laguugu talagalay. Bakteeriyadu isla markiiba ma dhimato. Taasi waa sababta aad muddo dheer u qaadanaayo daawooyinka.

Haddii aadan u qaadana daawooyinka si habboon, ama aad badanaa iloowdo, daaweyntu ma shaqeyn doonto. Bakteeriyaduna ma dhiman doonto. Sidaas oowgeed waa muhiim inaad daawooyinka qaadato isku waqti maalin kasta illaa aad ka dhameyneyso kuurada oo dhan.

Maxay tahay inaan sameeyo haddii aan ilaawo inaan qaado daawooyinkayga? Maalinta xiggta sidii caadiga ahayd u qaado daawada. Haddii aadan xasuusan illaa maalinta xiggta, ha qaadan labo kuuro laakiin u sheeg dakhtarkaaga marka xiggta ee aad balanta la leedahay.



Sidii caadiga ahayd cuntada ma u cuni karaa inta aan qaadanaayo daawooyinka?

Haa, waxaad cuni kartaa wax kasta ood jeceshahay. Ha cabin wax khamro ah inta aad qaadanaayo daawada. Haddii aad la qaadato daawada, waxay dhibaatooyin ku keeni karaan beerka.



Si caadi ah ma u qaadan karaa daawooyinka kale inta lagu jiro muddada daaweynta?

Mar walba u sheeg dakhtarka ku daaweynaaya daawooyinka kale ee aad qaadato. Kuwaas waxaa kujira daawooyinka uurka looga kortago ee aad qaadato (sida kaniiniyada). Daawooyinku waxay kaniiniga ka dhigi karaan mid aan si fiican u shaqeyn. Sidaas oowgeed waxaad qaadi kartaa uur. Haddii aadan dooneyn inaad qaado uur, waxaad isticmaali kartaa cinjirka galmada, cirbada uurka xakameysa ama aada intra-uterine device (aalada uurka lagu xakameeyo).



Daaweynta kahortaga ah wax saameyn ah malaga dhaxlaa?

Daawooyinku waxay yeelan karaa saameyn waxyeelo. Kaadidaada, saxaradaada, dhididkaaga ama ilintaada waxay yeelan karaan midab oranji ah. Mar kasta ood sameyneeso baaritaan, dakhtarka iyo/ama kalkaalisada kahortaga qaaxada (TB) waxay mar walba ku waydiin doonaa inaad la kulantay waxyeelooyin caafimaad.

Daawada cudurka qaaxada mararka qaar waxay yeelan kartaa saameeno caafimaad oo halis ah.

Waxaa laga dhaxlaa waxyeelooyinkaansoosocda:

- Nabaro maqaarka kasoo baxa
- Lalabo
- Calool xanuun
- Indhaha oo jaale noqda (qaybta indhahaaga ee cad ayaa noqonaysa jaalle)

Jooji qaadashada daawada isla markiina lana xariir dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada Adeega Caafimaadka Dadwaynaha ee Dawlada Hoose (GGD gaar ahaan waaxda kahortaga cudurka qaaxada ee (GGD). Sidoo kale waa inaad la xariirto haddii aad qabto wax walaac ah ama aad isku aragto astaamo kale.

Haddii aadan qaadan karin ama aadan dooneyn inaad qaadata daawada

Haddii ay jirto sabab (mid caafimaad ama mid kale) oo aadan u qaadaneyn daawada, dakhtarka ayaa kaala hadlaaya arrintaan. Lix dii billood oo kasta muddo dhan labo sano, waxaa lagugu sameyn doonaa raajitada xabadka. Dakhtarku wuxuu qiimeyn ku sameyn doonaa raajitadaada si uu u eego inaad qabto cudurka qaaxada. Waxaad heli doontaa balan aad kusoo marayso raajitada.

Haddii aadan qaadan daawada, waxaad halis ugu jiri doontaa inaad qaado cudurka qaaxada. Raajitadu ma disho bakteeriyada.

Maxaan ku sameynaynaa xogtaada?

GGD waxay xogtaada gaarka ah ee ay haysto kuna jira faylka caafimaadka u kaydisaa qaab waafaqsan sharciyada qaanuunka degsan.

Ma qabtaa wax su'aalo, tallooyin, walaacyo ama bogaadin ah?

- Fadlan la xariir waaxda kahortaga cudurka qaaxada ee GGD ee deegaankaaga. Waxaad xogta xiriirka ka heli kartaa www.ggd.nl iyo kaarka casuumaada talaalka. GGDs waxay leedahay hanaan lasoo gudbiyo cabashooyinka.
- Waxaad xog dheeraad ah oo ku saabsan cudurka qaaxada ka heli kartaa www.rivm.nl/tuberculose.

This information is available in English at:

Xogtaan oo Soomaali ah waxaa laga heli karaa:

Te informacje można znaleźć w języku polskim na stronie:

ብዛንጻብ ትግርኛ ዝተተርጎሙ መልክዕ ናይቲ ናብሬታ፡ ኣብቲ ዝስዕብ ገጽ ክርከብ ይከኣል፡-

هذه المعلومات متاحة باللغة العربية في هذا الموضوع:

این معلومات به زبان دری در اینجا قابل دسترس است:



www.rivm.nl/en/tuberculosis/information-materials

Published by:

**National Institute for Public Health
and the Environment, RIVM**

PO Box 1 | 3720 BA Bilthoven

The Netherlands

www.rivm.nl/en

September 2022

Committed to *health and sustainability*